Casharka 9

1. Miyaa Ilaah dhammeeyey abuuristii samada iyo dhulka?
-Haa.

2. Maxaa Ilaah shaqada intuu billaabo, haddana ay qabyo uga noqon weyday?
-Maxaa wacay Ilaah isma beddelo.
-Welibana wax ka istaajinaya nuu dhammaystiro hawshiisa lama arko.

3. Markii ilaah bilaabay shaqada, myaa jinniyada iyo weliba shaddaanku istaajiyeen hawshiisa?
-Maya.

4. Maxaa Ilaah u nasan waayey maalintii toddobaad?
-Waayo Ilaah wuxuu dhammeeyey shaqadii uu qorshaystay ee abuurniinta.

5. Imisa maalmood ayaa Ilaah wax abuurayey?
-Lix maalmood oo qura.

6. Haddii aanu dhulka roob ku di'i jirin, sidee buu Ilaah dhulka ku waraabin jiray?
-Ilaah wuxuu dhulka ku waraabin jiray ceyryaamo iyo biyo dhulka hoostiisa ka soo baxaya.

7. Maxaa la oran jjiray beertii Ilaah abuuray?
-Waxaa la oran jiray beer Ceeden.

8. Yuu Ilaah Beer Ceeden u abuuray.
-Wuxuu u abuuray Aadan.



9. Maxaa Ilaah beer Ceeden ugu sameeyey ama abuuray Aadan?
-Waayo Ilaah aad buu u jeclaa Aadan.

10. Maxaa u weyddiin waayey Aadan haddii uu doonayo inuu Beer Ceeden dego iyo in kale?
-Waayo Ilaah baa Aadan Uumay, Aadanna Ilaah buu lahaa.

11. Maaddaama Ilaah abuuray dadka oo dhan, oo ay ka soo tarmeen Aadan, dadka ood han yaa iska leh?
-Waxaa iska leh ilaah.

12. Muxuu ahaa magaa geedkii kowaad ee Ilaah ka dhex beeray bartamaha Beer Ceeden?
-Wuxuu ahaa Geedka Nolosha.

13. Muxuu Ilaah ugu dhex abuuray geedka nolosha bartamaha Beer Ceeden?
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan cuno geedkaas, oo weligii noolaado.

14. Muxuu ahaa magaca geedkii labaad ee Ilaah ku dhex beeray Beer Ceeden?
-Waa geedak aqoonta wanaagga iyo xumaanta.

15. Geedka Wanaagga aqoonta iyo xumaanta maxaa Ilaah ka yiri ama amarkii uu Aadanka ka siiyey muxuuahaa?
-Ilaah wuxuu Aadan ku amray inaanu cunin miraha geedka.

16. Haddii Aadan cunay miraha Geedka Aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta, maxaa dhaaya?
-Aadan wuu dhima doonay.

17. Waa maxay dhimasho?
-Waa kala dhaqaaqid laga dhaqaaqayo, Ilaaha nolosha Bixiya.
-Waa kala dhaqaaqidda nafta iyo jidhka.
-Waa kala dhaqaaqidda Ilaah laga soo dhaqaaqayo oo la gelayo cadaabta.

-Bal aan akhrinno wixii Ilaah yiri, kaddib markii uu uumay Aadan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:18

18-Oo Rabbiga Ilaaha ahu wuxuu yidhi, Maa wanaagsana in ninku keligiis ahaado; waxaan u samayn doonaa md caawisa oo kuhabboon.

-Ilaah wuxuu go'aansanday in Aadan aanu kelidiis noqon laakiin uu helo wehel.

-Ilaah wuxuu go'aansaday inuu naag u abuuro Aadan.

-Maxaa Ilaah u go'aansaday inuu naag u abuuro Aadan?

-Waayo Ilaah ma doonayn in Aadan kelidiis ahaado.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:19-20a

19-Rabbiga ilaaha ahuna wuxuu ciidda ka sameeyey dugaag kasta oo duurka jooga, iyo haad kasta oo hawada duula; oo iyagii wuxuu u keenay ninkii, inuu arko wuxuu u bixiyo; oo wax kasta oo duurka jooga, laakiin ninkii looma helin mid caawisa oo ku habboon.



20-Oo ninkii baa magacyo u bixiyey xoolaha oo dhan, haadda hawada, iyo dugaag kasta oo duurka jooga.

-Haddaba Bilowgii dunida ayaa Ilaah aada wax waliba madax uga dhigay.

-Bilowgii, Ilaah wuxuu nebi Aadan madax uga dhigay xayawaanka.

-Ilaah wuxuu nebi Aadan weyddiiyey inuu magacyo u bixiyo xayawaanka oo dhan.

-Markaa Aadanna xayawaankii buu magacyo u bixiyey.

-Ha yeeshee Aadan wuxuu ahaa qofka keliya ee dunida joogay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:20b

20-Laakiin Aadan looma helin mid caawisa oo ku habboon.

-Miyaa Ilaah abuuray Aadan iyo xayawaanka isku maalin? Maya.

-Sidee buu Ilaah ugu abuuray xayawaanka iyo dadka oo haddana u kala duway?

-Ilaah xayawaanka kama abuurin araggiisa.

-Ilaah dadka wuxuu ka abuuray araggiisa.

-Dadka waxay garan karaan Ilaah, laakiin xayawaanku garan maayaan Ilaah.

-Dadku waxay jeclaan karaan Ilaah, laakiin xayawaanku Ilaah ma jeclaan karaan.

-Dadku waxay dooran karaan waxay doorah karaanIlaah, laakiin xayawaanku ma dooran karaan Ilaah.

-Haddii Aadan wax ka fikirayo, miyaa xayawaanku weyddiin kareen waxa aadan ka fakarayo?
-Maya.

-Haddii aadan faraxsan yahay ama qoomamnaysan yahay, miyuu xayawaanka weyddiisan karaa inuu la faraxsanaado ama ay la qoomamoodaan isaga?

-Maya.

-Haddii Aadan doorto inu wax sameeyo, miyuu weyddiisan karaa xayawaanka inay isla waxa uu samaynayo la sameeyaan, oo ay hawsha la qabtaan?

-Maya.

-Miyaa xayawaanku ay Aadan u ahaayeen wehel isaga ku habboon?
-Maya.

-Aadan wuxuu u baahnaa  wehel uu la hadli karo, oo ku habboon.

-Maaddaama Ilaah jeclaa Aadan, Ilaah wuxuu goostay inuu xaawo u abuuro
-Naag.



-Myaa Aadan awoodi karay inuu naag samaysto ama abuuro?
-Maya.

-Miyaa Shayddaanka iyo jinniyadu ay awoodeen inay aadan naag u abuuraan?
-Maya.

-Waa kuma kan kelidiis awooday inuu qof dumar ah u abuuro Aadan?
-Ilaah.

-Maalin, ayaa Ilaah Aadan u abuuray Aaadan Naag.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:21-22

21-Oo Rabbiga Ilaaha ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii, kolkaasuu gam'ay, kolkaasuu wuxuu ka bixiyey feedhiisii middood, meedheediina hilib buu ku awday.
22- Oo feedhii Rabbiga Ilaaha ahu ka bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey, oo wuxuu iyadii u keenay ninkii.

-Ilaah oo keliya ayaa awooday inuu naag u abuuro Aadan.

-Ilaah awooddiisu dhammaad ma leh.
-Mana jirto wax Ilaah aanu samayn karin.

-Ilaah wuxuu abuuray naagtii ugu horraysay, wuxuuna hadiyad ahaan u siiyey Aadan.

-Haddii qofi ku siiyo hadiyad weyn, miyaad hadiyadda lagu siiyey si weyn uga taxadaraysaa?
-Haa.

-Haddii qofi ku siiyo qaalin lo' ah, miyaad ka taxaddaraysaa?
-Haa.

-Haddii qofi gaari ku siiyo, miyaad ka taxadaraysaa?
-Haa.

-Ilaah wuxuu abuuray naagtii ugu horraysay, wuxuuna iyada u siiyey Aadan sida hadiyad qaali ah oo weyn.

-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan daryeelo xaaskiisa ama naagtiisa.
-Aadan wuxuu doonayey oo kale inuu naagtiisa aad iyo aad u jeclaado.

-Bal aynu idiin akhrinno wixii Aadan yihi markii Ilaah siiyey isaa naagta.:

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:23-24.

23-Ninkiina wuxuu yidhi, Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga; waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag maxaa yeelay; iyada waxaa laga soo saaray Nin.
24-Sidaas daraaddeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa: oo waxay noqonayaan isku jidh.

-Ilaah wuxuu naagta ka sameeyey ninka si ay isku guursadaan oo mid u noqdaan.

-Ilaah wuxuu naagta u sameeyey ninka si ay u wada noolaadaan.
-Ilaah wuxuu naagta u sameeyey ninka si ay carruur ama ubad u kala helaan.



-Wax waliba ee Ilaah sameeyo, way wanaagsan yihiin.
-Wax waliba ee Ilaah wameeyo waa kaamil.

-Waxaa taas sabab u ah in Ilaah wanaagsan yahay oo uu welibana kaamil yahay.

-Ilaah kama fakari karo wax shar ah.
-Ilaah ma oran karo hadal shar ah.
-Ilaah ma sameeyo wax shar ah.

-Miyaad u malaynaysaa in Aadan ku farxay inuu hadiyad ahaan u helo naag?
-Haa.

-Aadan aad buu u farxay.

-Maxaa la horan jiray ama loo bixiyey naagtii Aadan?
-Magaca naagta Aadan wuxuu ahaa Xaawo.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:25

25-Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo naagtiisuba, mana ay xishoonaynin.

-Bilowgii, Aadan, ma xishoon jirin.
-Bilowgii, Xaawo qudheeduba ma xishoon jirin.

-Bilowgii, Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawo u abuuray si kaamil ah.
-Bilowgii, Aadan iyo Xaawo ma garanaynin wax shar ah.

-Bilowgii, Aadan iyo Xaawo waxay la socon jireen Ilaah, oo aad bay u faraxsanaan jireen.